

## War-murtiyeedkii ka soo baxay shirkii Mombasa, 7-11kii Diseembar 2009

Wadahadallo dheer iyo wadatashiyo aan nasasho lahayn ka dib, shirkii Mombasa ka dhacay:

- Wuxuu canbaaraynayaa dhacdadii naxdinta badnayd ee 3dii Diseembar, 2009ka ka dhacday Hotel Shamow ee Muqdisho; halkaasoo iyada oo ay ka socoto xaflad farxadeed oo qalin-jebin ah lagu diley ama lagu dhaawacay arday barashada cilmiga caafimaadka dhammaysatay oo shahaadooyinkoodii qaadan lahaa, waalidkii dhalay, buuniyaashii Jaamacadda Benaadir, warfidiyeenno, wasiirro iyo dad kale. Falkaas xoolannimada ku tilmaamani waa mid aan sina cad ugu lahayn dhaqanka Soomaaliyeed iyo diinta Islaamka toona. Isqarxintu waa dembi aadaminnimada ka soo hor-jeeda, waana in caddaaladda la soo hor-joojiyaa kuwii ka dambeeyey qorshaynta iyo fulinta falkaas foosha xun, in ay qaadataba. Shirku wuxuu ugu baaqayaa dadka Soomaaliyeed iyo bulshada caalamka labadaba inay garab-istaagaan Jaamacadda Benaadir.
- Wuxuu canbaaraynayaa dhaqanka isxisaabin la'aanta ee Soomaaliya ka jira, wuxuuna ku boorinayaa Xafiiska Qarammada Midoobey ee Xuquuqda Aadanaha iyo ururrada kale ee caalamiga ahba inay abuuraa guddi arrimahaas baaris ku sameeya.
- Wuxuu ugu yeerayaa bulshada caalamku inay wax ka beddasha siyaasadeeda Soomaaliya ku saabsan iyo inay horumariso, taageertana hay'ado-dhiska dhabta ah, Soomaaliyana ku abuurto miraha xukun-wanaagga.
- Wuxuu ka garaabayaa duruufaha ada'adag ee xukuumadda federaalka ahi ay ku hawl-geleyso, isaga oo shirku isla markaasna ka welwelsan horumarka gaabiska ah ee ku saabsan abuurista hay'adihii iyo hannaankii dawladda ee loo baahnaa. Sidaas darteed, wuxuu shirku xukuumadda ku-meel-gaarka ah ugu yeerayaa inay dhidibbada u taagto hay'adaha asaasiga ah ee dawladda, si dalka loogu soo celiyo qaynuun-ku-dhaqankii iyo kala-dambayntii.
- Wuxuu Xukuumadda Ku-meel-gaarka ah ku boorinayaa inay si fiirocoon u raadiso, una horumariso dadkii qaranka u adeegi lahaa, si, dabadeed, shaqaalaha dawladdu ay u noqdaan kuwo wax weyn ka tara sidii gobollada Soomaaliya oo idil xukun-wanaaggu uu ugu wada baahi lahaa.
- Wuxuu aqoonsanayaa kaalinta muhiimka ah ee Amisom ay ka qaadanayso xoojinta nabadda Muqdisho, isaga oo isla markaasna shirku ka welwelsan ku-isticmaalka xoogga xad-dhaafka ah iyo waxyeellada dadweynaha rayadka ah ka soo gaadha.
- Wuxuu si xoog leh u canbaaraynayaa in, si dano siyaasadeed loo gaaro, gacan-ka-hadal la adeegsado; taas oo ah waxa As-Shabaab iyo Xisbul-Islaam ay faraha kula jiraan.
- Wuxuu aqoonsanayaa waxtarka iyo naf-hurka aan xadka lahayn ee warfidiyeennada, wuxuuna ku boorinayaa dadka ay khusayso inay

maamuusaan, ay ilaaliyaan kaalinta qiimaha weyn leh ee la xiriirta dib-udhiskaa iyo dib-u-soo-noolaynta dawladda Soomaaliyeed.

- Wuxuu aqoonsanayaa burcad-badeednimada in looga adkaan karo oo keliya in xididdada loo siibo xarumaha ay birriga ku leeyihiin, isla markaasna dhallinyada aan shaqada haysan in laga hor-joogsado inay inay burcad-badeedda ku biiraan. Sidaas darted, ka-qaybgalayaasha shirku waxay bulshada caalamka ku boorrinayaan maamullada ka jira meelaha ay burcad-badeeddu ku badan yihiin inay ugu deeqaan taageero xagga farsamada ah, barnaamijyo dhallinyarada lagu dhaqan-celinayo iyo dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha, si shaqo ugu abuuranto. Wuxuu kaloo shirku welwel ka muujiyey boobka iyo tuugada aan dhammaadka lahayn ee lagu hayo kheyraadka badaha Soomaaliya iyo qashinka sunta ah ee lagu daadinayo biyaheeda.
- Wuxuu aqoonsanayaa kaalinta aan wax la mid ahi jirin ee dumarku ay ka qaataan nabadda iyo horumarinta Soomaaliya, wuxuuna xukuumadda ku boorrinayaa inay dhawrto xuquuqda dastuuriga ah ee ay ku leeyihiin ka-qaybqaadashada dhammaan heerarka ay xukuumaddu leedahay. Dumarka qudhoda waxaa lagu boorrinayaa inay ku midoobaan aragti ay wada aaminsan yihiin, si loo horumariyo kaalmaha ay ka geli karaan qaybaha kala duwan ee bulshada.
- Wuxuu aqoonsanayaa qurbe-joogta Soomaalidu sida weyn ee ay muhiimka ugu yihiin horumarinta iyo nololaha malaayiin qof oo Soomaali ah, isla markaasna wuxuu welwel aad ah ka muujinayaa lacagaha ay u soo kala diraan kooxaha dalka ku dagaallamaya.
- Wuxuu u bogayaa sida firfircoonida leh ee ay shirka uga soo qayb-galeen ganacsatadii gudaha Soomaaliya ka timid, kuwii gobolka ka yimid iyo kuwii dibedda uga soo sodcaalay dhammaantood, wuxuuna shirku ugu baaqayaa inay si xoog leh ugu hawl-galaan nabadaynta iyo dib-udhiska Soomaaliya.
- Wuxuu geesinnimo-gelinayaa horumarinta iyo hay'adeynta maamullada maxalliga ah iyo kuwo gobolladaba.
- Wuxuu dhalinyarada Soomaalida ku guubaabinayaa inay midoobaan, si ay, sida ugu wanaagsan, wax uga taraan horumarka dalkooda hooyo.
- Wuxuu ku guubaabinayaa ka-qaybgalayaasha shirka Mombasa inay gutaan xilkooda oo ah inay bulshooyinka iyo meelihii ay kala yimaadeen la socodsiiyaan habkii uu shirku u dhacay iyo natiijooyinkii ka soo baxay, si aragtida ku saabsan nabad dhab ah oo Soomaaliya ka hirgashaa ay meelmar u noqoto.

*Soo baxay 11 Diseembar, 2009  
Mombasa, Kenya*